Su'aalaha Badiyaa La Weydiiyo

Agagaaraha Dabiiciga Ah

… Meesha carruurta aan lahayn talax-yaraantu ay wakhtigooda ku qaataan.

Sharcigu waxa u leeyahay…
Qaybta C ee ku saabsan Qanuunka Waxbarashada Shaqsiyaadka leh Talax-yaraanta Wax-ku-biirinteedi 1997 ayaa odhanaya in inta ugu badan ee ku habboon, adeegyada horey wax ug-qabashada waa in loogu fidiyo agagaraha dabiiciga ah, ooy ku jiraan guriga iyo goobaha beeshu ay leedahay ee carruurta aan lahayn talax-yaraanta ay ka qayb-galaan. Adeegyada waxa kaliya loogu fidin doona goob ka duwan ta agagaraha dabiiciga ah marka horey wax uga-qabashada si qanac leh loo kari waayo qabashadeeda agagaraha dabiiciga. Qaybta 632 (4)(G) iyo Qaybta 635 (a) (16) (B)]

Agagaaraha dabiicigu maxay muhiim u yihiin?

Waa dabiiciga ilmaha iney wax bartaan maalinta oo idil waxay doonto ee waxqabad ha noqotee ama meesha isagu ama iyadu u joogo/ay joogto.

Sidee lagu gartaa ilmaha agagaarkiisa dabiici?

Agagaaraha dabiicigu waa maalin ka maalin goobaha iyo waxqabyada kor u qaada waxbarashada carruurta. Caruurtu waxay bartaan "biyo' markey ku ciyaarayaan "bathtubka" (meesha loogu gubeeyo), markey gacmaha ku meydhanyaan jikada goobta weelka lagu xalo, soo qaadashada caabitaanka, biyaha fadhiya ka batalqeysiga, ama ku dabaalashada meesha lagu dabaasho. Intaa waxa sii dheer garashada waxa biyo yihiin, carruutu waxay baranayaan xirfado iskood –wax-u-qabsi ah ooy ka mid yihiin sida wax looga cabo koob, gananta iyo wajiga meydhashadooda, xubno dhaqaajinta sida socodka iyoo bootinta oo kale ah. Agagaaraha dabiicigu waa meelo waxyaaban waxqabadyadan maalin kasta la sameeyo ay ka suuto galaan, oo ay ku jirto musqusha, jikada meesha weelka lagu xalo, ardaaga xagga danbe iyo goobta lagu dabaasho ee dadka ka dexeeya. Agagaaraha dabiicigu waa lagu tilmmaantaa qoyska kolba markey ka hadlayaan waqabadyadooda ama noloshooda. Waxa laga yaaba iney arkaan awoowo, oo ay u lugeeyaan tukaanka, soo qaadaan boostada, ayga waxa cunsiiyaan ama dharka meydhaan. Kuwaasi waa fursado wax lagu baro ama wax lgu barato.

Maxaana ahayn agagaaraha dabiici?

Meelaha carruurtu badiyaa tagto maadaama laga yaabe talaxyaraan (disabilities) awgeed ama arrimo kale oo caafimaad oo ay ka mid yihiin kiliinikyada, cusbitaallada, xafiisyada terabiga (therapy), ama xarumaha tababarku ma aha agagaaraha dabiici. Gooni u takoorka carruurta baahida gaarka ah lehi

waxay badiyaa ugu sii hor seeddaa gooni ahaan sii dheeraad ah. Waxay xaddidaa fursadaha ay ku heleyaan bulsho ku dhex-gal carruurtu iyo qoyskuba labaduba. Carruurta baahida goonida ah lehi waa iney yeeshaan khibraddeeda nolosha, ciyaarta, iyo xidhiidhitaanka dhexdeeda "aduunyada dhabta ah" si

Yaa u go'aamiya agagaarka dabiiciga in ilmuhu helo horey wax-uga-qabashada adeegyadooda.?

Kooxda Adeegyada Qorshaha Qoyska ee Goonida ah (IFSP), ooy ku jiraan waalidka ilmaha ayaa go'aan ku gaadha agagaaraha dabiiciga ah ee adeegyada lagu bixinayo. Ugu sii horeynta nidaamka IFSP (qaadashada), adeeg isku-duwaha iyo xubnaha kale ee kooxda ayaa ka wada hadli waxyaabha had iyo sida caadiga ay u sameeyaan iyo waxqabdyada kale, oo waliba waxa ku jira waxay ka welwelsan yihiin iyo waxyaabaha waxa kasta ay ka horesiinayaan qabashadeeda. Waxaas oo idil ayaa la qaddarin marka la sameynayo IFSP oo, ilaa inta ku haboon baahida ilmaha, adeegyada waxa lloogu fidin goobaha ilmhu ku nool yahay, wax ku barto, iyo u ku ciyaaro.

Maxay u tahay hadda in loogu fidiyo adeegyada agagaaraha dabiiciga ilamaha?

Marka ugu horeysa, sharciga fedraalka ah ee Qaybta C ee Qanuunka waxbarashada Shaqsiyaadka leh Talax-yaraanta (IDEA) ayaa had iyo jeer uga baahaneyd in horey wax uga-qabashadu (Ubadku Ma-sugi Karaan) in adeegyada ugu fidiso agagaaro dabiici ah. Awood dib-usiinta sharcigan 1997 ayaa sii xoojiyey uga baahnidaas. Marka xiga, arrintani waa mid wax looga garan carruurta iyo qoysaska. Marka adeegyada loogu siiyo sidii waxaqabayada caadiga ah ee nolosha, qoysku waxay helayaan fursado badan malinta oo idil iney dhiirri galiayaan ilmahooda iney wax bartaan oo ay ku barabartaan xirfado cusub, oo ilmuhu waxa laga yaabaa iney u badato in soo bixiyo natiijooyinaka loo baahanyahay. Marka saddexaad, ku fidinta adeegyada agagaaraha dabiiciga ah ayaa waxa dhici karta in ay hakiyaan noq-noqodka gooniyowga iyo qoqobka dadka talax-yaraanta leh.

Ilmo ayaa markii hore ku qaadanayey adeegyo meel kiliinik ah. Maxaa la sameeyaa haddii qoysku rabaan iney ku sii wataan ku sii qaadahsda adeegyada halkaa?

Qoysku waxa ay had iyo jeer dooran karaan iney ka heelaan adeegyada fidiye aan ku bixin adeegyada agagaaro dabiici ah. Hase ahaate, adeegyadaasi looma qaddarinaayo adeegyo horey wax uga-qabasho. Ubadku Ma-sugu Karaan ee ka Miisaanka Qayb-qaadashada Kharashku ku shaqyn meesyo oo qoysaska yaa lacag ahan mas'uul ka noqon adeegyadan.

Maxaan sameeyaa haddii aan qabo su'aalo kale oo ku saabsan agagaaraha dabiiciga ah?

La xidhiidh isku-duwaha adeegyada ee UMK, Horey Wax Uga-qanbashada deegaanka (Ubadku Ma-sugi Karaan) Isku-duwaheeda, Waalid waxbaraha UMK, ama xafiiska Ubadku Ma-sugi Karaan ee Gobalka (404-657-2726 or toll lacag la'aan 888-651-8224).

Waxa soo saarey ooqaybieyey Guddiga Wakaalada ha-wada shaqeyntooda iyo Isku-duwidda Gobalka Joorjiya si adeeg ay ugu noqoto carruurta da'da yar ee leh talax-yaraanta iyo shaqaalaha horey wax uga-qabashada iyo fidiyeyaasha.

La Nakhtiimey 1/27/00

DHR
GEORGIA
DEPARTMENT OF
HUMAN RESOURCES